



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 9^{ka} Sibtember 2025

Gacaliyaal Qoysas,

Mar kale ku soo dhawaada sannad dugsiyadeedka cusub– aad ayey u wanaagsaneyd in aan dhammaantiin idiin aragno idinkoo diyaar u ah waxbarashada. Waxaan dhawreynaa sannad kale oo wanaagsan iyo Cabot.

Fadlan imoow ee nala hadal haddii aad wax walaac ah qabtid. Waxaan ognahay in Bristol ay ka dhaceen shaqaaqooyin dhammaadka usbuuca waxaanna dooneynaa in aan ku xasuusino in aan dooneyno in qof walba uu ahaado mid nabdoon qeybna ka ah Cabot. Waxaa jiray dhacdo ka dhacday Stapleton Road maalintii Jimcaha waxaana ogahay in waalidiinta qaar ay arkeen waxa dhacay waana ku faraxsannahay in aad noo sheegteen. Waxaan ognahay in dhacdooyinkaas ay saameyn nagu yeelanaayaan dhammaanteen gaar ahaan marka aan u dhawnahay. Waxaa kaloo jiray bannaanbax usbuuca dhammaadkiisii oo ku saabsan qaxootiga – waan ku faraxannahay in aan nahay dugsi matala dhammaan dadka, ayna ku jiraan carruur badan oo dhaqammo kala duwan leh kana kala yimid waddamo badan. Fadlan la hadal shaqaalaha haddii ay kula tahay in aan si uun aan kuu caawin karno.

Xusuusin, fadlan qaado raashinka tabarugaadda maalinta Jimcaha laakiin waa xusuusin raashinka waxaa loogu talo-galay bulshada Cabot oo dhan marka fadlan ahoow mid tixgeliya dadka kale si dadka oo dhan ay uga faa'ideystaan.

Waad ku mahadsan tahay inaan dhammaan shaqaalaha cusub oo dhan aad dareensiiyay soo dhaweyn diirran. Waxay ku faraxsan yihiin bulshada Cabot waxayna dhawraayaan in ay si shuraako ah kuula shaqeeyaan.

Ugu dambeyn, xusuusin waxaa dooneynaa in dhammaan carruurta iyo dadka waaweyn ay dareemaan nabad si ay dugsi u yimaadaan – fadlan hubi in aad jidka u isticmaashid iyo baabuur dhigasahada si tixgelin leh aadna u noqoto tusaale caruurta oo dhan si loogu wada shaqeeyo shuraakad, tusineysa wadajir iyo hagaagsanaan kuwaasoo ah qiyamkeenna.

Mahadsanid,

Mrs L-H



Taariikhaha Xusuus-Qorka

- 9^{ka} Sibtember dugsi ka dib – Y1 and Y2 la kulanka macallinka.
- 16^{da} Sibtember dugsi ka dib – Y3, Y4, Y5 iyo Y6 la kulanka macallinka
- Usbuuca billaabanaaya 15^{la} Sibtember dugsi ka dib – fasalka Risabshanka R la kulanka macallinka
- 23^{da} Oktoobar – qoysaska waxaa lagu casumi doonaa in ay arkaan fasallada
- Usbuuca billaabanaaya 27^{da} Oktoobar fasax– dugsi ma jiro.



Imaanshaha

Celceliska imaanshaha dugsi usbuucii hore wuxuu ahaa **84%**. Waxaan ogahay in aad nagala shaqeyn doontid hagaajinta arrintaan si aan u gaarno **yoolkeenna 96%**.

Waxaan ognahay in filashada Dowladda iyo Cabotay yihiin in carruurta dugsi yimaadaan maalin walba marka laga reebo marka ay aad u xanuusan yihiin.

Haddii canuggaada uu buko uuna dugsi imaan karin, fadlan xafiiska dugsi kala soo xiriir 01173772630 si aad noogu sheegto. Waxaa laga yaabaa in aan guriga kugu soo booqanno haddii aan war kaa helin waxaana laga yaabaa in aan sameyno booqasho bad-qab hubin haddii uu canuggaada maalmo badan xanuunsan yahay.

Fasaxyada waa in tikidka la goostaa waqtiga uu dugsi fasax yahay, ganaax ayey kuu soo diri kartaa Xukuumadda Deegaanka haddii canuggaada uu dugsi imaaneynin. Ma dooneyno in mid ka mid ah caruurta uu seego Xaqooda Waxbarasho.

Raashinka Lacag La'aant ah

Xusuusin in aad hubsio in aad xaq u leedahay raashinka lacag la'aanta ah– tan macnaheedu waa in canuggaada uu xaq u leeyahay raashinka lacag la'aanta ah maalin walba lagana yaabo in uu xaq u leeyahay faa'idooyin kale si uu uga qeyb galo naadiyada dibadda iwm.

Foom ayaad xafiiska weydiisan kartaa ama waxaad geli kartaa mareegtaan.

<https://www.bristol.gov.uk/residents/schools-learning-and-early-years/travel-and-free-school-meals/free-school-meals> si aad u codsato.



Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630